# Qiyamka bulshada

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَى وَيَنْهَى عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنكَرِ وَالْبَغْيِ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ}**

**(Ilaahay waxa uu idin amrayaa falista cadaalada iyo samo falka, kaalmaynta qaraabada, waxa uu idinka reebayaa xumaanta, falka foosha xun iyo xad-gudubka ,waa idin waaninayaa si aad u waanaqaadataan)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Inay bulshada qiyam leedahay waxay daliil u tahay inay sarreyso oo ay ilbax tahay waana sirta ku jirta ishaysigeeda iyo isku xirnaanteeda iyo xasilloonideeda, sidoo kale wuxuu ka bilowdaa burburka bulshadaha burburka qiyamka bulsheed, bulshadaha aan ku dhisnayn akhlaaq waxay wadataa wixii dumin lahaa; maxaayeelay waxay ku taagan tahay meel taag daran, maxaa ka fiican gabyaaga oraahduu yiri:

**إنَّمَا الأُمَمُ الأخْلاقُ ما بَقِيَتْ *** فإنْ همُ ذَهَبَتْ أَخْلاقُهُمْ ذَهَبُوا**

**Ummadaha waa akhlaaq intay jiraan**

*******

**Hadday akhlaaqdooda tagto iyagana way tagaan**

Shaki kama taagna in diinteena xaniifka ah ay ku dadaashay qiyamka bulshada oo ilaalinaysa jiritaanka bulshada, oona xoojinaysa tiirarkeeda, maxaayeelay ilaalinta qiyamka iyo akhlaaqda waa aasaaska diintan weyn, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إنما بُعِثْتُ لأُتَمِّمَ مكارمَ الأخلاقِ).**

**(Waxaa laysoo diray inaan dhammeystiro akhlaaqda suuban)**

Qiyamka bulsheedkan waxaa ka mid ah: qiimaha iskaashiga iyo istaakulaynta, nolosha oo la wadaago taasoo bulshada oo dhan wax u tarta, wadanka waxaa iska leh dadkiisa oo dhan, iyaguuna ku taagan yahay, iyagoon lagu kala saareynin diin ama midab ama jinsi, taas waxaa ku sugan in la tirtiro nafjeclaysiga iyo anaaniyada iyo wax la gooni noqoshada, waxay xoojinaysaa in la adkeeyo mabda’a walaaltinnimada dadka, taasoo aasaaseysa bulsho isku xiran oo ku taagan jacayl iyo waxbixin, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى وَلا تَعَاوَنُوا عَلَى الإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ}**

**(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مثلُ المؤمنين في تَوادِّهم، وتَرَاحُمِهِم، وتعاطُفِهِمْ مثلُ الجسَدِ، إذا اشتكَى منْهُ عضوٌ تدَاعَى لَهُ سائرُ الجسَدِ بالسَّهَرِ والْحُمَّى)**

**(Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa),** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ الأَشْعَرِيّينَ إِذَا أَرْمَلُوا فِي الغَزْوِ ، أَوْ قَلَّ طَعَامُ عِيَالِهِمْ بِالْمَدِينَةِ جَمَعُوا مَا كَانَ عِنْدَهُمْ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ ، ثُمَّ اقْتَسَمُوهُ بَيْنَهُمْ فِي إِنَاءٍ وَاحِدٍ بِالسَّوِيَّةِ ، فَهُمْ مِنِّي وَأَنَا مِنْهُمْ)**

**(Ashcariyiinta markay xiliga dagaalka hanti waayayaan ama cuntada caruurtooda magaalada ku sugan ay yaraato waxay ku soo ururiyaan hal weel waxa ay haystaan, kadib ayay ugu qeybsadaan si isla eg, iyaga way iga mid yihiin anigana iyagaan ka mid ahay).**

Qiyamka bulsheedka waxaa ka mid ah: qiyamka dadnimada iyo wax huridda iyo wax dhiibidda, taasoo xoojinaysa isbahaysiga iyo isku xirnaanta qarameed iyo midda bulsheedba, waxay abuuraysaa kalgacal iyo walaaltinnimo, daacadnimo ka dhexeynaysa bulshada dadka ku nool, taasna waxaa tilmaamay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), wuxuu reebay in lays naco oo lays xasdo oo lays jaro oo lakala dheeraado, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لَا تَحَاسَدُوا ، وَلَا تَنَاجَشُوا ، وَلَا تَبَاغَضُوا ، وَلَا تَدَابَرُوا، وَلَا يَبِعْ بَعْضُكُمْ عَلَى بَيْعِ بَعْضٍ)**

**(Ha is xasdina ha is falisina ha nicina ha is dabajeedinina qaarkiina qaarka kale yaysan ku dul iibin)**

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(وَمَنْ كَانَ فِي حَاجَةِ أَخِيهِ كَانَ اللَّهُ فِي حَاجَتِهِ، وَمَنْ فَرَّجَ عَنْ مُسْلِمٍ كُرْبَةً فَرَّجَ اللَّهُ عَنْهُ كُرْبَةً مِنْ كُرُبَاتِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ)**

**(qofka danta walaakiisa ka shaqeeyo Ilaahay ayaa dantiisa u fulinayo, qofka ka feydo muslin kurbo Ilaahay wuxuu ka feydayaa kurbo ka mid ah kurbooyinka maalinta qiyaame, qofka muslin asturo Ilaahay maalinta qiyaame ayuu asturayaa)**

Waxaa ka mid ah: qiimada ay leedahay in lagu dadaalo dadka tabaalaysan iyo agoonta iyo dadka tabarta yar iyo duqooshinka, iyadoo loo arkayo daryeelkooda inuu yahay waajib diini ah iyo mid wadani iyo insaniba, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(السَّاعِي علَى الأرْمَلَةِ والمِسْكِينِ كالْمُجاهِدِ في سَبيلِ اللَّهِ، أوْ كالَّذِي يَصُومُ النَّهارَ ويقومُ اللَّيْلَ)،**

**(kan wax u qabta garoobta iyo miskiinka wuxuu la mid yahay qof dar Alle u jihaadaya mise kan maalinta oo dhan soomaan habeenkana taagan)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(هلْ تُنْصَرُونَ وتُرْزَقُونَ إلَّا بضُعَفائِكُمْ؟)**

**(Miyaa laydinku gargaarayaa kuwiina tabarta yar mooyee),** sidoo kale islaamka wuxuu u arkay dadka lixaadkooda dhamaystirnayn waxqabadkooda inuu yahay awood bulshada ku soo kordhaysa waxay kudayasho u noqonayaan dadka kale; waxaa loogu fasaxay si ay kaalintooda uga qaataan nolosha bulshada si saameyn leh, sidaa awgeed sayidkeena Cabdullaahi bin um Maktuum (Alle raalli haka noqdee) wuxuu ahaa mu'addinka nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), sidoo kale wuxuu mas'uul uga dhigay Madiina marar badan si dadka uu imaam ugu noqdo oo danahoodana u adeego.

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan

Waxaa ugu muhiimsan qiyamka bulsheedka: qiimaha iska ilaalinta iyo hubsashada wararka intaan la faafinin kahor, shareecada islaamka waxay adkeeysay qiimaha sharafta leh, waxay ka digtay kuwa faafinaya kutirikuteenka, iyadoo loo arkayo faafinta kutirikuteenka in looga dan leeyahay in bulshada hoose lagasoo dumiyo, iyo in la faafiyo quusashada iyo niyadjabka dadka dhexdooda, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَإٍ فَتَبَيَّنُوا أَنْ تُصِيبُوا قَوْمًا بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَى مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ}**

**(Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad fasheen)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كَفَى بِالْمَرْءِ كَذِبًا أَنْ يُحَدِّثَ بِكُلِّ مَا سَمِعَ)،**

**(Qofka waxaa ku filan been inuu sheego waxkastoo uu maqlo),** qofka caqliga leh wuxuu fikirayaa intuusan hadlin, doqonkana wuu iska hadlaa asoon fikirin, wuxuu leeyaay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ)**

**(qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro wanaag ha sheego ama ha iska ammuso)**.

Maxaa ka qurux badan inaan qabsano qiyamka bulsheedka, si dadka bulshada ku nool oo dhan ay isu bahaystaan oo ayna isugu xirnaadaan.

**Ilaahayow nagu hanuuni akhlaaqda tan ugu fiican, kumana hanuuniyo midaan adiga ahayn**